



Goobaha Bulshada

ISBEDDELKA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Kaalmada Goobaha Bulshada waa sii soconayaan si ay helli karaan macaamiishu inta lagu jiro faafka COVID-19. Si kasta ha ahaatee, waxaa laga yaabaa sida loo bixiyo adeegyada ayaa laga yaabaa inay wax iska bedelaan iyada oo waafaqsan talada sarkaalka caafimaadka.

Goobaha badankood, waxaa jira hoos u dhac xiriirka shakhshakhsiga ah. Hogaamiyayaasha Goobaha ayaa sii wada xiriirka shakhsiyeed iyaga oo telefoon kula xiriiraya. Fadhiyada kooxaha ayaa laga dhigayaa online, si loo xaqiijiyo in bulshadu la xiriirto hogaamiyayaasha goobta, shakhshakhsi siina wadaan inay ka qaybaglaan xarakaadka muhiimka ah sida xiisadaha Ingiriiska ee wada-sheekaysiga.

Wax ka baro astaamaha [COVID-19 iyo astaameheeda](#).

Waa maxay goobaha Bulshadu?

Goobaha bulshada (oo loo yaqaan Barnaamijka Goobaha Bulshada Qaranka (National Community Hubs Program) ayaa ah meela lagu soo dhoweeyo soogalootiga iyo qoysaska qaxootiga, khaasatan hooyooyinka iyo carruurta dhalinta yaryar.

Goobaha Bulshada waxay ku yaalliin dugsiya hoose waxayna ka caawimaan dadka barashada Ingiriiska, horumarinta xirfada cusub, helidda shaqo iyo bixinta caawimada lagu hello adeeyada kaalmada Xukuumada.

Xaggee ku yaalliin Goobaha Bulshada?

- NSW: Parramatta, Blacktown, Canterbury Bankstown, Fairfield, Cumberland, Wollongong, Liverpool
- VIC: Brimbank, Dandenong, Hume, Banyule, Geelong, Shepparton
- QLD: Logan, Ipswich
- SA: Port Adelaide – Enfield, Salisbury

Liiska dugsiyada hoose oo leh Goobaha Bulshada iyo faahfaahinta meesha lagala xiriirayo waxaa laga helli karaa [halkan](#).

Adeegyada nooc ee ah ayay bixiyaan Goobaha Bulshadu?

Adeegyada la bixiyaa waa kala duwan yihiin bulshada dhexdeeda, si loo xaqiijiyo inay buuxiyaan baahiyaha agagaarohooda. Tusaale ahaan noocyada xarakaadka ayaa ah kuwa soo socda:

- Barnaamijyada kooxaha wada cayaara ee sanadaha hore
- Xiisadaha Ingiriiska iyo barnaamijyada wada sheekaysiga
- Hanaan nololeedka caafimaad iyo xirfadaha kale ee nololaha iyo kooxaha

- Hawlgelinta waalidka iyo barnaamijyada dhisidda awooda
- Barnaamijyada farbarashada luqadda Carruurta
- Fursadaha iskaa wax-qabashada iyo kaalmada shaqada
- Tababaridda xirfada rasmiga ah iyada oo lala wadaagayo TAFE iyo ururada tababarka ee diiwaangashan
- Aqoonsi-kororsiga horumarinta xirfadaha aan caadiga ahayn
- Kooxaha bulshada iyo danaynta khaaska ah
- Safarada goobeed iyo dibad baxa kooxeed
- U xawilidda barnaamijyo kale oo kaalmaynaya xaalladaha

Xaq ma u leeyahay in aan hello adeegyada?

Dhammaan soogalootiga waa lagu soo dhowaynayaa Goobta bulshada. Waxaa jira juhdi gaar ah oo hooyooyinka soogalootiga ah ee carruurta leh.

Sidee ku ogaan karaa wax badan oo ku saabsan adeegyada Goobta Bulshada?

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaad intaas ka badan booqo websaytka [Goobaha Bulshada](#) ama wac 03 8614 3430.